



Gacaliye Waalid/Mas'uul:

Dugsiyada Waxbarashada Lexington waxay ardeyda u sameynayaan Google Mail Account. akoontiga email-kani wuxuu u saamaxayaa in uu canugaaga kala xiriiro maclimiinta. Waxaa sidoo kale ardeyda uu awood u siinayaa in ay ku wada xiriiraan internet-ka iyaga oo is weydaarsanaya macluumaad iyo waliba website-yo waxbarasho. Akoontiga email-kani waxaa loogu talagalay oo kaliya in loo isticmaalo waxyaabaha iskuulada oo kaliya. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waxaa la siinayaa furaha ay ku gali lahaayeen akwoontiyadani emailada waxaana lagu dhiiragalinayaa in ay la socdaan wax yaabaha ay sameynayaan ardeyda. Macluumaadka akoontiga iyo waliba waliba furaha lagu galayo akooniga waxaa lagu soo diri doonaa guriga marka aad saxiixdid warqada ogolaanshaha waana in aad warqadaasi dib ugu soo celisaa iskuulka.

Dugsiyada Waxbarashada Lexington Waxay ku dhiiragalinayaan ardeyda in ay internet-ka si wanaagsan oo xil kasnimo ku dheehan u isticmaalaan marka ay kula xiriirayaan bulshada. Maadaama ardeyda fasalka gudihiisa lagu baro website-yo kala duwan iyo waliba qaabab kala duwan oo loo isticmaalo koombuyuutarada, maclimiinta waxay ardeyda kala hadli doontaa mas'uuliyada saaran ardeyda iyo waliba anshaxa wanaagsan ee la doonayo in loo isticmaalo internet-ka. Ardeyda waxaa laga doonayaa in ay u hogaan samaan Sharciga Hoboon ee Isticmaalka internet-ka ee ku xusan Website-ka Dugsiyada Waxbarashada Lexington:

<http://www.lexschools.org/district-information/technology/policies-procedures>

Daacadnimo,

Dugsiyada Shacabka Lexington

Ardeyga looma sameynayo email-akoonti iyaga oo aan waalidkood/mas'uuka aan u soo saxiixin.

Waan fahamsanahay hadafka iyo u jeedada email-ka iskuulka uu u sameynayo canugeyga waana hubinayaa in anshax wanaagsan uu ku dhaqmo canugeyga.

Saxiixa Waalidka/ Mas'uulka _____ Taariikhda _____

Waan fahamsanahay hadafka iyo u jeedada email-ka uu iskuulka canugeyga u sameynayo waana xaqiijinayaa in loo isticmaalo hawlaha iskuulka oo kaliya.

Saxiixa Waalidka/ Mas'uulka _____ Taariikhda _____